

Xogta Dugsiga Sare:

Tani waa turjumaada Af-Soomaaliga ee Xog Uruurinta Telefoonka ee Dugsiga Sare Diiwaan Galinta kahor taasoo aad ku heli doonto luuqada Ingiriiska:

Tani waa fariin aad muhiim ah oo kaaga timid Guddoonka Waxbarashada Deegaanka ee Dugsiyada Toronto looguna talagalay cunugaaga galaaya fasalka (fasalka u munaasabka ah ee cunugu dhigan doono) bishaan Sebteembar. (Waxaad helaysaa hal wicitaan telefoon halkii cunugba mid kasta oo kamid ah carruurtaada. Telefoonka waxaa lagu aqoonsan doonaa fasalka ardaydu dhigtaan).

Wasaarada Waxbarashada ayaa ku dhawaaqday in dugsiyada sare lagu furaayo qaab la diyaarshay oo leh habraacyada caafimaadka iyo qabka oo kor loo qaaday. Gudaha TDSB, ardayda ayaa dhigan doonaa dugsiga maalin kasta, ayadoo la yaraynaayo tirada fasalka lagana dhigaayo ku dhawaad 15 arday, ayadoo waxbarashada lagusii wadaayo ayna ku jiraan labadaba waqtiga shaqada madaxa banaan iyo waxbarashada oonleenka ah ee layfka loo dhigaayo.

Waxaa intaas dheer, dugsiyada sare waxay ku shaqayn doonaan jadwal rubuc ah kaasoo dugsiga u qaybinaaya afar qaybood oo midkooba yahay 44 maalmood, taasoo rubuc kasta ardaydu qaadanayaan laba koorso.

Haddii aad doorato inaad cunugaaga usoo dirini waxbarashada dugsiga la tagaayo bisha Sibteembar, qaabka gabi ahaanba oonleenka ah ayuu cunugaagu heli doonaa asagoo guriga jooga ayadoo la adeegsanaayo Waxbarashada Oonleenka ah ee Dugsiga Oonleenka TDSB. Waxbarashada oonleenka ah waxaa lagu bixin doonaa qaabka waxbarashada oonleenka ah ee caadiga ah maadaama aan la hayn ilo dheeraad ah oo qaabka waxbarashada dugsiga ee gaarka ah lagu bixinaayo.

Waa in dugsigaagu abuura liiska fasalka ee Sibteembar, marka waxaan kaa codsanaynaa inaad cunugaaga ka qorto hadda dugsiga tooska ah (tani waxay ka dhigan tahay inuu dugsiga tagaayo) ama waxbarashada oonleenka ah (waxay ka dhigan tahay oonleen buu wax ku baranayaa).

1) Sida uu dugsiga ugu laaban doono cunugaagu bisha Sibteembar:

Riix 1 si aad u doorato "Cunugaygu waa imaan doonaa dugsiga"

Riix 2 si aad u doorato "Cunugaygu wuxuu dugsiga Ku dhigan Doonaa Qaabka Oonleenka ah"

Waad kumahadsan tahay isdiiwaan gelinta. Fadlan booqo websetkeena oo at www.tdsb.on.ca si aad u hesho wararkii ugu danbeeyay iyo xog ku saabsan talaabooyinka xigga.